

Gacaliye

Waxaan ognahay in waalidiintu ay qabaan su'aalo badan oo ku saabsan goorta carruurta ka yar 12 sano ay awoodi doonaan inay qaataan tallaalka COVID-19, waxaanan doonaynay inaan bixinno wargelin ku saabsan hannaankan.

Tallaalladu waa lagu saraasaynayaa looguna daraasayn doonaa si taxaddar leh carruurta ka yar 12, isla sida ay ahayd ba dadka 12 iyo ka weyn. Nidaamkan waxaa loogu yeeraa tijaabo caafimaad oo dhammaan tallaalada oggolaanshaha haysta ayaa soo maray. Tallaallada la muujiyey inay badbaado iyo waxtar u leeyihiin koox da'eedkan ayaa la oggolaan doonaa.

Pfizer waxay hadda u gudbisay Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (FDA) natiijooyinkooda tallaalka loogu talagalay carruurta da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 11. Haddii ay ansixiyaan FDA iyo Guddiga La-talinta CDC ee Dhaqannada Tallaalka, oggolaanshaha tallaalka ayaa la filayaa inuu yimaada Oktoobar ama Nofeembar. Marka la oggolaado, u qaybinta tallaalka ee 5–11 sano jirka ah ayaa laga bilaabi doonaa gobollada.

Marka tallaalka la oggolaado, Minnesota waxay diyaar u tahay inay tallaasho kooxdan da'da yar waxaanna leenahay habab badan oo kala duwan oo tallaalka lagu qaadan karno. Waxa kaliya ee aad u baahan tahay inaad samayso waa in ilmahaaga la tallaalo markay u qalmaan. In la tallaalo ayaa ah habka ugu wanaagsan ee loo badbaadin karo ilmahaaga iyo dadka ku xeeran.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan tallaalada, [takhtarkaaga carruurta ama takhtarka qoyska ayaa ku wanaagsan xog warsysi-y—Adeeg bixiyeyaashu waa inay wax ka beddelaan siday u arkaan]. Waxaad kaloo macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa [Waxda Caafimaadka ee Minnesota](#) iyo [Xarumaha Xakamaynta](#) iyo Kahortagga Cudurrada.

Maxay tahay sababta aan u Tallaalayo Ilmahayga?

In ilmahaaga la tallaalo waxay ka caawisaa inay ammaan ahaadaan inta la joogo dugsiga, isboortiga iyo waxqabadyada kale ee bulsheed ee muhiimka u ah inuu ilmuhu waayo-aragnimo u yeesho. Tallaalidoodu wuxuu kaloo caawiyaa badbaadinta xubnaha qoyska ee nugul, saaxiibbada iyo deriska.

CDC-da ayaa sidoo kale sheegtay in **dadka aan la tallaalin ay in ka badan 10 jeer u badan tahay in isbitaal la dhigo** marka loo eego kuwa si buuxda loo tallaalay. Ma saadaalin karno cidda aad ugu xanuunsan doonta COVID-19, sidaa darteed qaadista tillaabooyinka looga hortagayo dadka inay xanuunsadaan, sida tallaalka, aad bay muhiim u yihiin.

Haddii aad danaynayso qaadashada tallaalka ama hadda aad haysato ilmo ka weyn 12 sano, wakhtiga tallaalidda ugu habboon waa hadda. Waxaad ka heli kartaa tallaalka bogga internetka ee [Hel Tallaal](#) ee Minnesota ama [Vaccines.gov](#).

Sideen U Ilaalin Karaa Ilmahayga Inta Aan Sugayno Tallaalka?

Ilaa inta carruurta da'doodu tahay 11 sano iyo ka yar ay heli karaan tallaal, baaridda iyo xirashada maaskaraha, kala-fogaanshaha jireed, ka fogaanshaha goobaha dadku ku badan yihiin, gacmo-dhaqashada iyo joogista guriga marka ay jiran yihiin ayaa ah dariiqyada muhiimka ah ee ilmahaaga iyo qoyskaaga loogu hayn karo badbaado iyo caafimaad.

Carruurta aan la tallaalin ee dugsiga waa in la baaraa ugu yaraan toddobaadkii hal mar, ama in ka badan markay joogaan meelaha ay ku badan yihiin caabuqyada sida ku cad tilmaamaha CDC. Booqo [Hel Goobaha Baaridda \(https://mn.gov/covid19/get-tested/testing-locations/index.jsp\)](https://mn.gov/covid19/get-tested/testing-locations/index.jsp) si aad u xulato ikhtiyaaraad kuu dhow. [Dugsiga ilmahaagu wuxuu kaloo baari karaa ardayda markaa hubso inaad wacdo maamulka dugsiga. —dugsiyada bixiya barnaamijka baaritaanka goobta waa inay wax ka beddelaan siday u arkaan hadba.]s

Hal shay oo kale: sida ugu wanaagsan ee loo ilaalin karo carruurta aan weli la tallaali karin waa iyada oo qof kasta oo agagaarka ah la tallaalo, taas oo gacan ka geysan doonta yareynta faafitaanka fayraska ee bulshadooda. Fadlan tallaal xubnaha qoyskaaga ee jira 12 sano iyo wixii ka weyn oo ku dhiirri geli dadka kale inay iska ilaaliyaan fayraska oo ay yareeyaan faafidda iyagoo tallaalkooda qaanaya.

Fadlan nala soo socodsii wixii su'aalo dheeraad ah, waxaan halkan u joognaa inaan ku caawino!

[Magaca]

[Jagada]